Central Maine Healthcare
The Central Maine Medical Family
300 Main Street • Lewiston, Maine 04240 • Telephone 207 795-0111

XUQUUQAHA IYO MASUULIYADAHA BUKAANKA

Daryeelka caafimaad waa waayo-aragnimo la wadaago oo ku lug leh bukaanada iyo kuwa bixiya darreelka. Maadama aan aqoonsanahay, qiimayna oo xushmeeyno qiimaha shaqsiga iyo sharafta bukaan kasta ee Xarunta Daryeelka Caafimaad ee Miane u adeegto, bayaankan xuquuqaha bukaanka ayaan u bixinay si ka turjumaysa falsafadeena iyo ballanqaadyada bukaanadeena.

1. Xaq u lahaansho daaweyn iyadoon la eegeynin da'da jinsiyadda, qoomiyadda, diinta, dhaqanka, luqadda, naafanimada jirka ama maskaxda, heerka dhaqaale, sameyska galmo, iyo aqoonsiga jinsiga ama.

2. Xaq u lahaansho shaqaale texgelin, badqab, daryeel xushmad leh, xirfad iyo karti leh.

3. Xaq u lahaanshaha inay mujiyaan ruuxda ay rumeysanyihiin iyo hab dhaqamada dhaqan ilaa iyo heer aysan waxyeelo geeysanaynin dadyoowga kale ama faragelinaynin daaweynta.

4. Xaq u lahaanshada filashada inta awoodeena ah, qadarinta codsiyadda adeegyada macquulka ah haddii caafimaad ahaan haboonyihiin oo sharci ahaana yihiin kuwo la oggolyahay. Haddii ay wareejin daruuri tahay xarunta qaabilaysa iyo bixiyaha waa inay marka hore aqbalaan. Bukaanka waa in sharxaad la siiyaa sababta wareejinta daruuri u tahay iyo badelka wareejintaas.

5. Xaq u lahaanshaha filashada sii wadida daryeel suuragal ah iyo wargelinta daryeelayaasha fursadaha daryeelada kale macquulgalka ee jira. Sido kale xaq u lahaanshaha helidda baridda haboon iyo taclimiinta ee daryeelayaasha si loo hanto fayo-qab iyo badqab heer sare ah

6. Xaq u lahaanshaha helidda xubin qoyska ah, matal, qof gargaare ah iyo ogeysiinta dhakhtarka gaarka xiliga jiifinta iyo helidda qof gargaare ah inuu joog si u bixiyo taageero shucuureed.

7. Xaq u lahanshaha xiriir wax ku ool ah iyo texgelin xaga luqada, araga, hadalka, maqalka, iyo dhinaca maskaxda. Xaq u lahaanshaha helitaan turjumaan iyo fasiraad.

8. Xaq u lahaanshaha helitaanka macluumadka khuseeya cudurka oo dhameystiran oona hadda ah, daaweynta iyo sahminta marka laga reebo gargaarka degdega xiligaas oo bukaanka awood maskaxeed lahayn loona baahanyahay daaweeyn degdeg ah.

9. Xaq u lahaanshaha ogaashada magaca daryeel bixiyaha leh musuuliyada koowaad ee daryeelkaaga iyo xirfadlayaasha bixin doona daaweeynta iyo adeegyada.

10. Xaq u lahaanshada ka qeybgalka go'aanada daryeelkiisa ama keeda, daaweeynta, iyo adeegyada.

11. Xaq u lahaanshada aqbal ama diidmo daaweyn ama daryeel abreeshan kolka la sharxo halisyada iyo fa'idooyinka sida waafaqsan sharciga iyo qanuunka. Haddii bukaanku yahay mid da'yar wakiilka sharciga ah ayaa laga qeybgelinaya go'aan gaarista.

12. Xaq u lahaanshaha ka qebygalinta ama diidida xubin qoyska ah ka qeybgalinta go'aanada daryeel.

13. Xaq u lahaanshaha filasho asturnaan iyo go'aanada gaarka ee khuseeya hadalada caafimaad, wadatashiga, baaritaanada iyo daaweeynta.

14. Xaq u lahaanshaha diwaanada iyo macluumaadka inay si hab asturanaan leh u maareeyaan kuwa sida tooska ugu lug leh daryeelkaaga, iyo kuwa u xaq leh dib u eegidda macluumaadka diwaankaaga sida waafaqsan sharciga iyo qaanuunka.

15. Xaq u lahaansho inay daryeel-bixiyaasha ku dadaalan maareeynta iyo xakamaynta xanuunka dhamaan bukaanada.

16. Xaq u lahaanshaha gaarida go'aan sugan hadii ama hadiisan ka qeybgalaynin cilmi baaris, baaritaan ama tijaabooyin caafimad. Golaha Xarunta Dib u Eegida, Guddiga Anshaxa iyo Waaxda Cilmi baarista ayaa u heelan inay cawiyaan hadii loo baahdo.

17. Xaq u lahaanshada in laguu sheego waxa khuseeya *Advance Directives* (Dardaaran, Ammarada Bixiyaha Daaweeyn Noolal raagta, POLST, Qareenka Awoodda Caafimad) iyo sida go'aanada khuseeya daryeelkaaga loo gaarayo haddii aad awoodi weyso inaad isu hadasho adiga.

18. Xaq u lahaanshaha helitaan adeegyo ilaalin iyo u doodid.

19. Bukaanku xaq ayey u leeyihiin in loo sheego qarashaadka cusbitaalka, habka biilalka, iyo qorshooyin bixinno ee la heli karo.

20. Xaq u lahaanshaha in loo sheego nidaamka maamul ee cusbitaalka xal u helidda khilafaadka, cabashooyinka iyo isku dhacyada. Xarunta Daryeelka Caafimaadka Maine waxay leedahay Barnaamijka Xiriirka Bukaanka si ay caawimad u bixiso haddii loo baahdo.

Central Maine Healthcare
The Central Maine Medical Family
300 Main Street • Lewiston, Maine 04240 • Telephone 207 795-0111

XUQUUQAHA IYO MASUULIYADAHA BUKAANKA

Masuuliyadaha Bukaanka

1. Bukaanada waxay masuul ka yihiin bixinta – sida ugu wanaagsan ee aqoontooda – si sax ah oo dhameystiran macluumaadka dhamaan khuseeya xaaladooda caafimaad.

2. Bukaanada waxay masuul ka yihiin inay dhakhtarkooda iyo/ama daryeel bixyahooda usoo sheegaan is-beddelada xaladooda.

3. Bukaanada waxay masuul ka yihiin raacidda qorshaha daaweynta iyo tusmooyinka sida ay ku heshiyeen bukaanka iyo daryeelayaasha.

4. Bukaanada waxay masuul ka yihiin la shaqeenta shaqaalaha iyaga xanaaneynaya iyo inay su'aalo weydiyaan marka aysan fahmin tusmooyinka.

5. Bukaanada waxay masuul ka yihiin ka qeybgalka fursadaha waxbarasho ee la siiyo iyo horumarinta qorshaha daryeel cusbitaalka kadib.

6. Bukaanada waxay masuul ka yihiin inay daryeel caafimaad bixyayaasha u sheegaan wixii khuseeya *Advance Directives* ee laga yaabo inay leeyihiin iyo is-beddelada ay ku sameeyeen dukumintiyadaan.

7. Bukaanada waxay masuul ka yihiin racitaanka xeerarka iyo qawaaniinta cusbitaalka, ay ka midyihiin xushmaynta hantida iyo bukaanada kale, xafiisyada iyo cusbitaalka.

8. Bukaanada waxay masuul ka yihiin weydiinta qaladaadka ku jira biilalka si waqti leh iyo bixinta macluumaadka daruuriga ah iyo foomamka si loo fududeeyo bixinta biilalkooda.

9. Bukaanada waxay masuul ka yihiin tixgelinta iyo xushmaynta bukaanada kale, gaar ahaan khuseeya shanqadha, TV, iyo martida.

10. Bukaanada waxay masuul ka yihiin la xiriirida daryeel bixiyayaashooda, kalkaaliyaha, xubnaha kale ee kooxda daryeelka, ama inay wacaan Xiriiriyaha Gaarka ee Bukaanka si ay jawaabo uugu helaan su'aalahooda khuseeya daryeelkooda caafimaad ee cusbitalka.

11. Bukaanada waxay masuul ka yihiin inay naga caawiyan hagaajinta howlaheena iyo adeegyadeena iyaga oo inoo sheegaya cabashooyinkooda. Cusbitaalka Bridgton, fadlan la xiriir Maamulka 647-6099. Cusbitaalka CMMC, fadlan wac Xafiiska Xiriirka Bukaanka 795-2398. Cusbitaalka Rumford, fadlan la xiriir Maamulka 369-1488.

Waxaan kaloo rabnaa inaad ogaato inaad xaq u leedahay cabasho usoo gudbin karto ha'yadaha soo socda:

(DHHS Qeebteeda Shatiga & Shahaadooyinka)
DHHS Division of Licensing & Certification
State House Station, Augusta, Maine
Tel: 1-800-383-2441

(Guddiga Wadajirka – Tayo Dhoorka)
Joint Commission - Quality Monitoring
Tel: 1-800-994-6610
Email: complaint@jointcommission.org

KEPRO
5700 Lombardo Center Dr, Suite 100
Seven Hills, OH 44131